

Kitaabka Quduuska ah ee loogu talo galay Carruurta Soo-jeedinayaa



Dhibaatay La Kulantay Kaniisaddii



Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: Janie Forest
Alastair Paterson

Waxa dhaqan-geliyay: Ruth Klassen


Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia

Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org


©2025 Bible for Children, Inc.

Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyaayso ama daabacato
qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.

Kontan maalmood ka dib Wiilkii Ilaah wuxuu ka
sarakacay geeridii, Ruuxa Qudduuska baa yimid oo
ku dhex noolaaday xertiisii. Inkasta oo ay xertii
aysan fahamsanayn siduu Ilaaha Aabbaha, Ilaaha
Wiilka iyo Ilaaha Ruuxa Qudduuska ay isku wada
yihiin Mid keliya, waxayse ku faraxsanaayeen Ilaah
inuu iyaga la joogo. Ilaahna aad buu uga caawiyey
rasuuladii inay dadka wax uga sheegaan
waxyaalihii ku saabsanaa Ciise.




Dadkii rumeystay oo idil way wada jireen oo wax walbana waa ka wada dhexeeyey oo ku masaakiinta ahna way dhagaalayn jireen.




3

Laakiin hal qoys oo isqabay oo lagu magacaabi jiray Ananiyas iyo Safira ayaa wax xun sameeyey. Waxay iibiyeen qaar ka mid ah hantidoodii oo waxay iska dhigeen oo jileen inay lacagtii oo idil u keeneen rasuuladii. Si qarsooni ah ayay inkale oo lacag ah u qarsadeen.




4

"Maxaa Shaydaanak qalbigaaga u geliyey inaad Ruuxa Qudduuska ah been u sheegtid ...?" Butros ayaa sidaa ku yidhi ananiyas. Oo nimankii dhalinyarada intay kaceen ayay isagii duuddubeen markaasay qaadeen oo soo aaseen.



5


Inyaroo saacado ah ka dib, Safira ayaa soo gashay ama timid, iyadoo aan ogayn wixii dhacay iyo inuu ninkeedii dhintay. Iyada qudheeda been bay ka sheegtay lacagtii - oo waxbaa iyana ku dhacay. Oo kuwii taas maqlay oo idil cabsi weyn baa gashay.



6

Ilaaha Ruuxa Qudduuska wuxuu rasuuladii gacamhooda ku sameeyey calaamooyin iyo yaabab badan. Tusaale ahaan, dadkii buqay waa la


bogsiiyey markii Butros dul maray iyaga.




7

Waxay ahayd wakhtigii yaababka waaweyn jireen, xaadarnimada Ilaahna la muujiyey. Dad badan baan rumeystay Ciise. Taasi aad buu uga cadhooday wadaadkii

sare. Rasuuladii xabis buu ku riday!



8



Laakiin malaa'igtii Rabbiga ayaa habeenimadii albaaabadii ka furtay, oo intay dibadda u soo saartay, ku tidhi, "Taga oo macbudka isdhex taaga, oo waxaad dadka kula hadashaan

ereyada oo dhan ee noloshan." Rasuuladii intay dibada u soo baxeen ayay bilaabeen dadkii inay ku wacdiyaan waxyaalihii ku saabsanaa Ciise. Aroortii, raggii wadaaddadii sare waxay arkeen jaylkii oo madhan.

9

Markii ay soo heleen ugu dambayntii, Wadaadkii sare ayaa canaantay rasuuladii. "Miyaanu idinku amrin inaydan magacan dadka wx ku barin?" "Waa inaannu Ilaah addeecno intaannu dad addeeci lahayn." Baa Butros iyo rasuuladii baa sidaa ugu jawaabay" oo markii ay taasi maqleen, way ka xanaaqeen, oo waxay ku tashadeen inay laayaan. Taasi bedelkeeda intay garaaceen bay iska daayeen.



10

Iyaga oo ku jira xiqdi nacayb xun, ayay rasuuladii iska sii wateen inay dadka ku wacdiyaan Ciise Masiixa.



11

Maalin baa waxaa la xiray nin lagu magacaabi jiray Stefanos. Stefanos wuxuu jeclaa Rabbi Ciise. Ruuxa Qudduuska ayaa u isticmaalay inuu dadka u sheego waxyaalaha ku saabsan Ciise.



12

Dad baa ka been abuurta, oo leh Stefen wuxuu ku hadlayaa waxyaalo ka soo horjeeda oolidda ku ah Ilaahay. Ka idb markii ay ku jeesjeeseen oo ku majaajiloodeen oo silciyeen ayay dhagax ku dileen sababtoo ah Ciise rumeysadkiisa uu rumeysan yahay.



13

Intii uusan dhiman ka hor, waxaa ka buuxsamay Ruuxa Qudduuska, ayuu samada aad u fiiriyey, oo wuxuu arkay ammaanta Ilaah iyo Ciise oo midigta Ilaah taagan.



14

Dadkii isu soo ururay ayaa Stefanos dhagxiyey isagoo u yeedhanaya Ilaah oo ku leh, "Rabbi Ciisow, ruuxayga qaado," Deedna sidii Ciisen markii uu iskutallaabta saarnaa, ayuu ninkan geesiga ah ku sameeyey isaga oo sii dhimanaya Ilaah ka baryay inuu dembiyadooda cafiyo dilaayaashiisa.



15

Dhimashadii Stefanos waxay bilowday mowjado dhibaatooyin silicyo cusub ah. Wiil dhalinyara ah oo la odhan jiray Sawlos, oo ka mid kuwii wax ka caawiyey dilayaashii Stefanos, ayaa xidh xidhay masiixi walba oo uu helo.




16

Qaar badan baa ka kala yaacay guryahoodii oo u baxsaday meelo kala duwan sida Samaariya iyo Yudeeya. Yerusaaalem wxaa joogay oo keliya rasuuladii keliya.



17

Inkasta oo uu cadowyadooda iksu dayayeen inay laayaan oo dilaan iyaga, kuwii kala firdhayday ee cararay meeshay tagaan ba dadka waxay ku wacdin jireen Ciise Masiixa. Mana aysan jirin wax ka hor istaaga kuwii raacay Ciise - sababtoo ah Ruuxa Ilaaha Qudduuska ah baa ku dhex noolaa iyaga oo ka sii dhex shaqaynayay iyaga.



18

Dhibaataay La Kulantay Kaniisaddii

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Falimaha Rasuullada 5-7

"Erayadaada furniinkoodu wax buu iftiimiya." Sabuurka 119:130

19

Dhammaad

56



60

20

Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Ciqaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro ciqaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysantahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad ugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16